

## **Bulshada deegaanka**

Hoyga aad degentahay, ama deegaankaagu waa bulsho. Goobtaan ayaad katirsantahay. Adiga iyo kuwa kale ee ku nool goobtani, waxa aad qayb ka tihiin wadajirka guud. Si ay u fiicnaato in lagu noolaado deegaankaaga aad daegentahay, waxa laga helaa deeqo kal duwan iyo nidaamyo loogu talagalay in la isticmaalo.

### **Deegaanka:**

Deegaankaagu ama deegaanka aad degentahay, waa bulsho ka yar bulsho weynta noorwiijiga. Waxaanana ladhahaa bulsho deegaandagmo.

Degmada (kommunen) dad dagenyahay waxa loogu yeeraa bulsho deegaandegmo. Qaar kale waxa laga yaabaa xaafad yar oo ka mid ah deegaanka ay degenyihiin in ay ugu yeeraan deegaan bulsho.

U fiirso musawirada hoos ku musawiran. Waxa aad arki kartaa in deegaanka bulsho aad ukala duwanyahay, marka loo fiiriyo meesha uu qofku dalka ka degenyahay

### **Nidaamka Guud**

Bulshada dagaan wada deggen waxay leedahay shagooyin iyo howlo ubaaxan in lawada qabto oo la xalliyo. Dadku waxa ay u baahanyihiin cunto, biyo, dhar, goobaha xannaanada ilmaha, dugsiyo, xafiis boost, takhtar iyo waxyaale kale oo badan. Bulshada deegaanku waa in ay samaysaa nidaam sidii sida ugu haboon loogu xallinlahaa shaqooyinkaan.

Degmooyinka qaar ayaa in badan la socdaa marka takhtarka ama dugsiga la,aadayo, halka degmooyin kale ay u dhowyihiin oo wax yar u socdaan. Laakiin nidaamyada iyo deeqhuba waa u diyaar dadweynaha.

Howlaha ama shaqooyinka waxa qabta dad kaalmo kala duwan kaga jira bulshada deegaanka. Haddii aan tusaale soo qaadano: Macalinku kaalintiisu waa macallinimo. Shaqadiisuna waa in uu ilmaha wax baraa. Takhtarka kaalintiisu waa takhtarnimo. Waana in uu bulshada daaweeyaa. Sidoo kale kalkaalisada caafimaadka, dhuldhaqdada, fuundiga, shafoorka mid waliba kaalintiisa ayuu u hayaa bulshada dagaanka uu ku noolyahay.

## **Rajo**

### **Waxa qofkasta laga sugayo**

Marka aad la kulanto dad kale, waxa aad ka sugtaa ama ka rajaysaa sida badan iyaga waxyaabo gaar ah. Waxa aad ka sugtaa in ay sameeyaan wax khaas ah, ama in ay u dhaqmaan si gaar ah. Laakiin dadka aad la kulantaa iyaguna wax ayey kaa sugayaan wax badan. Tan ayaan waxaan dhahnaa waxa aan iska sugno ama qofba qofka kale ka sugayo. Inta badan waad ogtahay waxa lagaa sugayo. Laakiin markasta ma ogid.

Shaqaalha xannaanadu waxay waalidka ka rajaynayaan /sugayaan in ay waqtiga ilaaliyaan.

Waalidku waxay rajaynayaan in ilmahooda loo xannaaneeyo marka ay xannaanada joogaan.

Waalidiintu shaqaalaha goobta xanaanada ilmaha ka shaqeeya waxa ay ka sugayaan in ilmahooda si fiican u dar yeelaan oo u xannaaneeyaan inta ay la

joogaan. Halka shaqaalaha goobta xannaanadu ka sugayaan waalidku in uu waqtiga dhawro marka uu soo doonayo ilmaha.



Illustrasjon: OpenClipart-Vectors / Pixabay

### Laylis

1. Maxaan uga jeednaa bulshada deegaanka.?
2. Maxaan uga jeednaa rajo?
3. Shaqooyin nooc ah ayaa muhiim ah in laga qabto bulshada deegaanka dhexdeeda?
4. Rajada ay ka sugayaan waalidiintu shaqaalaha goobta xannaanadu waa maxay?
5. Rajada shaqaalaha goobta xannaanadu ka sugayaa waalidka maxay tahay?